

ah waajibaad culus oo ah dib u soo noolaynta rejada ummadda soomaaliyeed iyo samata bixinta Qaranimada la cunaqabateeyey ee sii dhimanaysa.

Cudud xooggan oo horusocod dowladnimo doon ah Booliiska soomaaliyeed iyo Madaxdiisa oo qura ayaa laga hayaa, haddii dagaalkan aan u wajahno si fudud ama lababayn ah, guuldarrada ka dhalataa waxay noqon doontaa **"guul-darradii aan guuli ka dambeyn"**, sidaa awgeed isu dumo awoodaada oo dhan una diyaar garow wax kasta oo ah lama-filaan. Dagaal iyo muran sharci kasta oo ka dhasha arrintan la dagaallan musuqmaasuqa maaliyadda dowladda ahi, waa mid u yaalla Xeer ilaaliyaha guud ee Qaranka, Booliska soomaaliyeed waxaa laga doonayaa inay u hoggaansamaan awaamiirta xafiiskan oo qura marka laga hadlayo barista dembi dhacay iyo qabashada ciddii geysatey.

Hayadda UNDP waxay maamushaa Deqaha Caalamku siiyo Dowladda FKMG maadaama xukuumadeeda aan lagu aamini Karin musuqmaasuq awgiis, hase yeeshee sida dhabta deeqahaasi marnaba lama soo gaarsiin dadka soomaaliyeed, caddadkoodana lama yaqaan, xisaab-celintoodana cid aragtey ma jirto, golaha xukuumadda iyo golaha baarlamaanka oo arrintaas soo hadal qaada marna lama maqal.

Lacagtaas Deeqda ah, waxaa soo dhiibey dowlado shisheeye, waana qayb ka mid ah canshuurta ay bixiyeen muwaadiniintoodu, waxaa is-weydiin mudan deeqdaas maxaa la siiyey UNDP mise dadka soomaaliyeed, maxay uga aamusan yihiin madaxda sare ee dowladdu, maxaa loola xisaabtami waayey, maxaa Bankiga dhexe loo soo marsiin waayey si loo ogaado tiradeedu intay ahayd iyo meelaha lagu kala bixiyey.

Xafiiska xeerilaaliyaha guud ee Qaranku, wuxuu hadda ku guda jiraa barista deeqaha ay bulshada caalamku nagu taageertey caddadkeeda iyo inta naga soo gaartey, waxaanna deeq-bixiyayaasha caalamka u caddeynaynaa inaysan si sax ah noo soo gaarin lacagaha deeqda ah ee ay ummadda soomaaliyeed u soo dhiibeen. Hayadda UNDP dhaqankeeduna uusan ahayn mid leh accountbilty and transparence, meel laga tixraaco oo lagu kalsoonaan karaana ila hadda ma jirto. Wax la qariyo qurun baa ku jira, ugu dambeyntana waa la ogaanaya.

Md. Cabdulaahi Daahir Barre
XEER ILAALIYAHA GUUD EE QARANKA